SOOMAALIYA (KIIS GAAR AH)

Soomaaliya waxa ay ku jirtaa kiis gaar ah shan iyo toban sano oo xariir ah. Mudadda warbixinta, Dowlada Federaalka ah ee Soomaaliya (DFS) waxa ay gacanta ku heysay magaalo madaxdeeda Muqdisho. Dowlad goboleedyaduna waxa ay gacanta ku sii hayeen sida badan caasimdaha degaanadooda dalka oo dhan. Gobolka iskii isku magacaabay ee madaxa banaan ee Somaliland iyo Dowladda xubinta ka ah federaalka ee Puntland waxa ay gacanta ku sii hayeen amaanka iyo dhaqan galinta sharciga ee goboladooda. Dowlada Federaalka waxa ay ku laheyd saameyn kooban wixii ka baxsan Muqdisho; Kooxda argagixisada ah ee Al-shabaab waxa ay sii waday haysashada iyo gacan ku heynta dhulka baadiyaha ah ee Dooxada Jubba ee bartamaha-koofureed ee Soomaaliya. DFS waxa ay diirada saartay dhisidda awoodda iyo in ay ka ilaaliso weerarda Al-shabaab Muqdisho iyo xarumaha dowlada. Falaaganimada sii socotay ee Al-shabaab waxa ay ahayd caqabadda ugu weyn ee hortaagan awoodda dowladdu in ay si dhab ah wax uga qabato tahriibinta dadka. Meelaha qaar ee laga xoreeyey Al-shabaab waxa ay la kulmeen amaan darro dheeraad ah oo ay sababeen qabiilo iska soo horjeeda oo ku dagaalamaya awood siyaadadeed iyo gacan ku heynta kheyraadka. Dowladdu waxa ay laheyd awooda ugu yar ee ay wax uga qaban kartay dambiyada intooda badan oo ay ku jirto tahriibintu, sidaa daraadeedna waxa ay muujisay dadaal aad u yar ee dacwad ku soo oogid, badbaadin iyo ka hortag gobolada oo dhan. Qaar k amid ciidamada hubeysan ee dowlada dhexe iyo gobolada si joogta ah loo ma siin mushaar, boliiska Soomaaliya oo dhan waxaa ka maqnaa awood baaritaan oo haboon oo ay wax uga qabtaan kiisaska la xariira tahriibinta. Inkasta oo la soo sheegay in ay soo hagaagtay intii lagu jiray sanadka warbixinta, qaar saraakiisha Soomaalida waxaa ka maqnaa fahamka dambiyada tahriibinta khasabka ah , ka soo ay inta badan ku qasaan tahriibinta muhaajiriinta. Hayad Samafal oo aan dowli aheyn (NGO) ayaa soo warisay in saraakiil haysa xilal sare qaar ka mid ah dowlada goboleedyada ay ka macaashaan kooxada waxa tahriibiya gudaha Soomaaliya, sidaa daraadeed waxa ay wiiqaa dadaalada si dhab ah wax looga qabanayo ku lug la haanshahooda.

DADAALADA DOWLADA

Masuuliyiinta Somaliland iyo Puntland waxa ay sii wadeen dadaal kooban oo ay kula dagaalamayaan tahriibinta khasabka ah mudadda warbixinta. Deganaansho la'aan bulsho iyo ololaha daba dheeraaday ee lagu wiiqayo Al-shabaab darteed iyo in la abuuro sharci iyo kala dambeyn gudaha Soomaaliya aawadeed, ciidamada amaanka iyo saraakiisha garsoorku ma aanay heeysan shaqaale ku filan, aan helin tabar ku filan iyo iyaga oo la'aa awood ay si wax ku ool ah ugu dhaqan galiyaan sharciga. Sharcigii ciqaabta ee ka horeeyay 1991dii (oo ka dhaqan galay heerarka dowlada dhexe iyo gobol) waxa uu mamnuucayaa ku shaqeeysiga khasabka ah, iyo noocyada kale ee tahriibinta khasabka ah ee dadka. Qodobka 455 waxa uu mamnuucayaa oo uu ciqaab ka dhigayaa adoonsinga, isaga oo saaraya ciqaab shan ilaa 20 sano oo xarig ah. Qodobka 464 waxa uu mamnuucayaa ku shaqeysiga khasabka ah, isaga oo saaraya ciqaab lix bilood ilaa iyo shan sano oo xabsi ah. Qodobka 457 waxa uu mamnuucayaa wareejinta, tuurida, hanashada ama heysashada qof, waxa uuna saarayaa ciqaab sadex ilaa 12 sano oo xabsi ah. Dhamaan ciqaabahaas waa kuwo adag oo ku filan. Qodobka 408(1) waxa uu mamnuucayaa in dhilaysi lagu khasabo qof iyada oo loo marayo rabshado iyo handadaad, kaas oo saaraya ciqaab dhan laba ilaa lix sano oo xabsi ah, kasoo ah mid adag oo ku filan laakiin aan u dhigmin kuwa la saaray dambiyada kale ee aadka u culus, sida kufsiga. Dastuurka ku meel gaarka ah waxa uu mamnuucayaa adoonsiga, madiidin ka dhigasho, tahriibinta khasabka ah, iyo ku shaqeeysiga khasabk ah sida ku xusan qodobka 14aad. Qodobka 29(6) waxa uu mamnuucayaa in caruurta loo isticmaalo iska horimaadyada hubeysan. Sharciyada ka jira gudaha Somaliland waxa ay mamnuucayaan ku shaqeeysiga khasabka ah, madiidinimada aan raali laga aheyn iyo adoonsiga. Intii lagu jiray 2016, boliiska Soomaalidu waxa ay baareen hal kiis oo u muuqday tahriibinta khasabka ah, laakiin horay uguma sii socon nidaamka maxkamada sabab aan la aqoon darted. Masuuliyiinta Puntland waxa ay waxa ay dacwad ku soo oogeen 23 kiis oo tahriibinta galmada ee caruurta, sadax ka mid ahna waxaa ka dhalatay in lagu rido xukun; kiisaskaa waxaa ku lug lahaa todoba ah kuwa khasabka waxa ku masaafuriya iyo 61 dhibane. Kuwa

khasabka wax ku masaafuriyay ee la xukumay waxa ay muteen shan sano oo xabsi ah iyo ganaax dhan 1.6 malyan oo shilin Soomaali ah ($3,000)- waana tan ugu badan ee sharciga Puntland. Kaas oo kaliya ciqaaba darawaliinta qaada dhibanayaasha tahriibinta khasabka ah, si kastaba ha ahaatee ma jirin tirakoob lagu kalsoonaan karo heer dowladda dhexe iyo heer gobol oo kusaabsan baaritaanada, dacwo ku soo oogida ama xukunada dhacay ee la xiriira tahriibinta khasabka ah. Halka wararka ku saabsan saraakiisha lagu eedeeyay in ay ku lug leeyihiin fududeeynta tahriibinta khasabka ah ee galmada iyo ku shaqeeysiga uu ahaa guud ahaan mid aan la ogeyn, dowladu warbixin kama ay soo saarin dadaalada in baaritaan lagu sameeyo cabashooyinka la xariira saraakiil ka tirsan dowlada dhexe oo iibiya dal ku galo been abuur ah oo ay ka iibiyaan dulaaliinta safarada ama kuwa khasabka wax ku tahriibiya ama ay talaab ka qaaday saraakiisha xoogga dalka uu qorta iyo isticmaala caruur intii lagu jiray sanadka.

Gudiga heer wasaaradeed ah oo isku dhaf ah ee tahriibinta khasabka iyo tahriibinta ayaa uga shaqeeyay dowlada dhexe xubita isku duba ridida ka hortaga tahriibinta khasabka ah, kaas oo ay ku jireen wakiilo ka socday Wasaaradda Aminga Gudaha, Wasaaradda Arimaha Dibada, Wasaaradda Garsoorka, Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed (CBS). Iyo Wasaaradda Gudaha iyo Arimaha Federaalka, waxaana hor kacayay xoghayaha joogtada ah ee Wasaaradda Gudaha iyo Arimaha Federaalka; xubnaha gudigaanu waxa ay xariir la yeesheen masuuliyiinta heer gobol ee Puntland markii uu socday aqoon kororsi war isweeydaarsi ah ee ay maal galisay hay'ad caalami ah. Mudada sanadka warbixinta gudigu waxa ay bilaabeen sameeynta qorshe waxqabad qaran oo ku saabsan dadaalada tahriibinta khasabka ah, iyo intii lagu jiray Meey 2016 ra'iisul wasaaraha ayaa soo saaray wareegto uu ku cadeeynayo xubnaha iyo waajibaadka gudiga. Waaxada baarista dambiyada ee ciidanka boliiska Somaaliyeed waxa ay lahayd unug ka kooban 40 sarkaal oo Ka Hortaga Tahriibinta Khasabka ah iyo Dambiyada Abaabulan, laakiin sida laga soo xigtay urur caalami ah unugaanu marna ma helin tababar la xariira ka hor taga tahriibinta khasabka ah. Golaha Ka Hortaga Tahriibinta Khasabka ah ee heer gobol, oo la sameeyay Maarso 2013, ayaa horkacayay gudaha Puntland. Boliiska gobolka Puntland oo la kaashanaya hayad caalami ah ayaa u

sameeyay laba tababar oo dhameeystir ah oo ku saabsan baaritaanka tahriibinta khasabka ah 42 askari intii lagu jiray mudadda warbixinta. Intii lagu jiray Juun, 2016 dowlada Somaliland waxa ay sameeysay Hayadda Ka Hortagga Tahriibinta Dadka ee Somaliland, oo ay ku jiraan wakiilo ka socda socdaalaka, boliiska, ilaalada xeebaha, xafiiska xeer ilaaliyaha guud iyo wasaaradaha ganacsiga, maaliyadda iyo duulimaadka hawada rayidka ah. Hay'adda waxaa loo xil saaray isku dubaridka dadaalada looga hortagayo tahriibinta dadka oo ay ku jiraan diyaarinta sharciyo iyo aruurinta xog, laakiin shaqadeedu waxa ay aheyd mid gaabis ah.

Ma jirin hay'ad dowladeed oo leh hab nadaamsan oo lagu garto ama lagu aqoonsado dhibanayaasha. Lama helin Warbixin ku saabsan dadaalada DFS ee lagu dhowrayo dhibanayaasha tahriibinta khasabka ah. DFS iyo masuuliyiinta Somaliland ma anaay siinin adeegyo lagu dhowrayo dhibanayaasha tahriibinta khasabka ah waxa ayna si buuxda ugu tiirsanaayeen ururada caalamiga ah iyo NGOyada si ay u siiyaan dhibanayaasha kaalmo ay ku jirto cunto, dhar, hoy, kaalmo sharci, gargaar caafimaad, la talin iyo adeegyo dib ula midoobid. Intii lagu jiray sanadka warbixinta, masuuliyiinta Puntland waxa ay kala qeybqaateen bulshada rayidka ah si ay u siiyaan daryeel ilaalineed 23 dhibane ee tahriibinta khasabka ah; wax kale oo ay gacan ka geeysatay fudueeynta in ay guryahooda ku laabtan 29 dhibane oo aan qaan gaar aheyn. Si kastaba ha ahaatee qaar ka mid ah caruurtaas iyo kuwa helay adeeygayda daryeelka lagu ilaalinayay ayeey u muuqatay in ay ahaayeen dhibanayaal tahriib. DFS ma aanay siinin wax nood ama mood ah ururada kaalmeeynaayay dhibanayaasha. Gudaha Puntland 2016kii, masuuliyiinta gobolku waxa ay bixiyeen kirada, biyaha iyo korontada guri ay kireeystay hay'ad si ay ugu isticmaasho hoy ahaan dhibanayaasha tahriibinta khasabka ah; si kastaba ha ahaatee, inta ay la akeyd maalgalinta lagu bixiyay kaalmadaas lama heli Karin. Sidoo kale masuuliyinta gobolka waxa kale oo ay siiyeen kharaj gaadiid dhibanayaasha si ay awood ugu yeeshaan in ay ku laabtan guryahooda. Wasaaradda Arimaha Haweenka ee Puntland waxa ay maamushay guri badbaado oo loogu talo galay dhibanayaasha tahriibinta khasabka ah iyo rabshadaha qoyska gudaha Garoowe ee Puntland. Ma jirin qaab sharci oo looga saaro Soomaaliya

dhibanayaasha tahriibinta khasabka ah ee ajaaniitbta si looguna celiyo wadamadii ay ka yimaadeen oo ay kala kulmi karaan xaalad adag iyo aargoosad.

Masuuliyiinta Soomaaliya oo dhan waxa ay muujiyeen dadaal yar oo ay uga hortagayaan tahriibinta intii lagu jiray sanadka. Dowlad goboleedka Puntland, xubnaha gudiga ka hortaga tahriibinta khasabka ah waxa ay ka qeyb qaateen muddo sadax bilood ah idaacadaha, telefishinada iyo olole dhaqdhaqaaq bulsho wacyi galin ay soo abaabushay hayad caalami ah si dadweynaha loo dareensiiyo arimaha la xariira tahriibinta khasabka ah, oo ay ku jirto sida loo ogaado, loona soo sheego kiiska dhabata ah iyo kuwa la tuhmo ee tahriibinta khasabka ah; dowlad goboleedka Puntland ma aanay maalgalin barnaajimkaas. DFS ma aanay qaban waxa olole wacyi galin ah mudada warbixinta. Ma jirin hay'ad dowladeed oo siisay maaliyad hay'adaha kormeera shaqaalaha. Mana la shaqaaleeyn kormeerayaal fuliya sharciga shaqaalaha. Masuuliyiinta dalka oo dhan ma aanay sameyn dadaal la taaban karo oo lagu yareeynayo dalabka shaqaale xoog loogu shaqeeysto ama falalka ka ganacsiga galmada. Dowladu ma aanay siin tababro looga hortagayo tahriibinta shaqaalaheeda diblomaasiyiinta ah. Soomaliya qeyb kama aha Heshiiska QM 2000 ee heshiiska TIP.

Intii lagu jiray sanadka, waxaa jiray warbixino joogto ah in Xooga Dalka Soomaaliyeed (XDS), Ahlu Sunna Wal Jama, maleeshiyo beeleedyo, iyo Al-shabaab ay isticmaaleen caruur askar ah.

Dadaalka DFS ee ahaa in la dhameeyo u qorashada iyo isticmaalida caruurta waxa uu diirada saaray kaliya XDS. Hirgalintii dawlada ee qorshaha wax qabad ee 2012ka ee in la joojiyo qorashada iyo isticmaalka caruurta ee XDS waxa uu ahaa mid qabyo ah. Shaqada lixda sarkaal ciidan ee hor kacayay oo la magacaabay 2015kii waxa ay ahayd mid xadidan mudada warbixintan. Si kasta ha ahaatee, intii lagu jiray 2016, XDS Unuga Badbaadinta Caruurta waxa uu sheegay in ay ka sameeyeen gudaha Muqdisho, Guuwadayaasha, iyo Saldhiga Ciidamada ee Siyaad olole wacyi galin oo la xariira muhiimadda ay leedahay ka hortagida in loo qorto caruur ciidamada amaanka. Masuuliyiintu waxa ay ku wareejiyeen

caruur laga soo saaray kooxaha hubeysan urur caalami ah si loo daryeelo. QM waxa ay sii waday in ay soo gudbiso walaac la xariira xiritaanka iyo haynta qaar ka mid ah caruurta lagu soo eedeeyay in ay ka mid ahaayeen Al-shabaab oo ay geeysteen ciidamada Puntland. Inta badan Soomaalida waxaa ka maqan warqad dhalasho, iyo maqnaashaha qaab diiwaan galin dhalasho oo abaabulan ama hab guud oo qorasho, in la cadeeyo eedeeymaha caruurta oo askar loo qorto waxa ay aheyd mid adag.

Dhamaan dhulka ka baxsa gacanta dawaladda, Al-shabaab waxa ay si joogta ah ay ciidamada u qorataa caruur ay u isticmaalaan maleeshiyaadkooda, sida caadiga ah iyaga oo u maraya afduud iyo marin habaabin ama iyaga oo ku khasba odayaasha in ay ku wareejiyaan caruurta, iyo si sii kordheeysa iyaga oo u maray baqdin galin ka imaanaysa iyadoo fagaare lagu dilo caruur lagu eedeeyay in ay baxsadeen and jasuusnimo. Kooxda argagaxisadu waxaa ay xoog uga qorteen masaajidda, dugsiyada quraanka, iyo goobaha caruurta la dayacay. Al-shabaab waxaa ay u isticmaaleen caruurta dagaal iyo howlo kale oo taageero ah koofurta iyo bartamaha Soomaaliya, oo ay ku jirto dhigitaanka bambooyinka wadada dhinaceeda la dhigo iyo waxyaalahah kale ee qarxa, iyaga oo laga dhigto gaashaan waqtiyda ay howgalada fuliyaan, iyaga oo qaada khaarijin iyo ismiidaamin, bixiya wardoon, u adeega ilaalo ahaan iyo iyago oo ka adeega guryaha. Al-shabaab waxa ay sidoo kale khasab ku soo qorteen gabdho yar yar iyaga oo uga faa'iideystay madiidinimo xagga galmada ah.

TILMAANTA GUUD EE TAHRIIBITA

Soomaliya waa dal u ah il, loo sii maro iyo dal la'aado rag, haween iyo caruur loogeeystay ku shaqeysi khasab ah, tahriibin galmo. Wararka ku saabsan tahriibinta ee gudaha Soomaaliya waa mid ay aad u adagtahay in la helo ama la cadeeyo. Dhibanayaashu waxa ay inta badan ka yimaadaan gobolada koofurta iyo bartamaha Soomaaliya, waxaana loogu geeystaa masaafurinta khasabka ah gudaha wadanka, gaar ahaan Puntland iyo Somaliland ee waqooyiga. Gudaha Somaliland haweenka ayaa ah

kuwo soo qora iyo dulaala si loogu sii qaado dhibanayaasha Puntland, Djibouti, iyo Ethiopia iyada oo ujeedadu tahay in laga dhigto madiidin guryaha ama loo tahriibiyo galma ahaan. Saboolnimo iyo awood li'ida in ay daryeel siiyaan dhamaan xubnaha qooyskooda darteed, qaar ka mid ah Soomaalida ayaa iyagoo ogol ku wareejiyaan masuuliyda caruurtooda dad ay wadaagaan xiriir dhalasho ama ay isku qabiil yihiin, qaar ka mid ah caruurtaas ayaa laga yaabaa in ay noqdaan dhibanayaal xoog loogu shaqeeysto ama loo tahriibiyo galmo ahaan. Iyada oo caruur badan ay ka shaqeeyaan gudaha guryahooda ama meheradaha qoyskooda, waxaa laga yaabaa in qaar caruurta ka mid ah lagu qasbo shaqooyinka beeraha, howlaha guriga, ilaalinta xoolaha, iibinta iyo xamaalida jaadka, jajabinta dhagxaha, ama howlaha dhismada. 2014 kii, NGO caalami ah ayaa waxa uu sii daayay warbixin diiwaan galisay kiisas tacadi galmo iyo ka faa'iideysiga oo ay ku jiraan tahriibinta khasabka ah ee gabdho iyo haween Soomaaliyeed oo ay geeysteen shaqaalaha Yugaandha iyo Burundi ee Amisom. Baaritaan ay Midawga Afrika ku sameeyeen eedaymaha ayaa lagu soo gabagabeeyay in ay jirtay cadeyn ka faa'iideysi galmo, tacadiyo iyo tahriibin khasab ah oo eey geeysteen shaqaalaha AMISOM.

Inkasta oo uusan jirin tirakoob lagu kalsoonaan karo, Somaliland iyo Puntland waxaa soo gaaray qulqul muhaajiriin dhaqaale doon ah iyo qaxooti ka yimid meelaha ay dagaaladu baabi'yeen ee Yaman iyo gobolka Oroomiya ee Itoobiya. Dowlad goboleedyada Somaliand iyo Puntland waxa ay sheegeen tahriibinta iyo tahriibinta khasabka ah ay ka sii socotay Soomaaliya oo dhan iyada oo aheyd goobaha looga sii gudbo Liibiya, Suudaan iyo Yurub. Haweenka iyo gabdhaha muhaajiriinta ah ee ka shaqeeynayay dhaqaalaha aan rasmiga aheyn waxa ay gaar ahaan aad ugu nuglaayeen tahriibinta khasabka ah. Warbixino ayaa qoray kororka dabaqada dhexe ee muwaadiniin Soomaliyeed oo isku dayayay in ay u haajiraan Yurub, taas oo sare u qaada u nuglaashahooda in khasab lagu tahriibiyo. Urur caalami ah ayaa sheegay in dhalin yaro dadoodu u dhaxeeyso 18- 35 jir oo ka yimid bartamaha koofureed ee Soomaaliya, oo uu wado cadaadis in ay fursado shaqo u raadsadaan dibada, ay yihiin kuwa ugu nugul in khasab lagu tahriibiyo si loogu shaqeeysto. Sidii ku jirtay warbixintii hore, qaar ka mid ah

dadka asal ahaan laga tirade badanyahay- Baantuuga Soomaalida iyo Midgaanta waxa ay sii ahaayeen kuwa wajaha khatar ka weyn oo galmo iyo in khasab lagu masafuriyo, sida barakacayaasha gudaha iyo dadka ku nool goobahah ay gacanta ku heeyso Al-shabaab. Maamulayaasha iskood isku magacaabay ee qaar ka mid ah xeryahay barakacayaasha ayaa la soo wariyay in ay ku khasbaan gabdhaha iyo haweenka in ay u galmoodaan si ugu badashaan raashin iyo adeeg; qaar ka mid ah saraakiisha Soomaalida ayaa lagu eedeeyay in ay gacan ku leeyihiim ka faa'iideeysigaa. Maamulayaasha xeryahaasu waxa ay sii wadeen in ay kiro ku soo dalacaan ama khidmo halkii adeegyada asaasiga ee lacag la'aanta ah ayna ka iibiyaan qeeybaha ay maamulaan ee xerayaha gudahooda maamulayaal kale, taas oo abuuraysa meerto deyn ah oo ay qabaan barakacayaashu taas oo u nugleeysa tahriibinta khasabka ah iyo qaan la kala dhaxlo.

Sida laga soo xigtay urur caalami ah kuwa wax tahriibiya waxa ay u adeegsadaan marinhabaabin qaabka ugu badan oo ka badan hanjabaad iyo xoog, sidii ay isticmaaleen sanadkii hore. Kuwa xooga wax ku tahriibiya iyo kuwa wax tahriibiya waxaa la soo sheegay in ay ka faa'iideeystaan nuglaashaha haweenka barakacayaasha gudaha iyo caruurta, oo badi ka yimid Koofurta iyo Bartamaha Soomaaliya. iyaga oo mararka qaar isticmaala balanqaadyo been ah ee shaqooyin fiican ee yurub iyo waqooyiga Ameerika. Kuwa khasabka wax ku tahriibiya waxa ay mararka qaar sii marsiiyaan haweenka Soomaalida Jabuuti, una sii gudbiyaan bariga dhexe, halkaas oo ay si joogta ah ugu mutaan madiidinimo guryaha ah ama iyaga oo lagu qasbo dhileysi. Raga Soomaalidu waxa ay la kulmaan xaalado xoog loogu shaqeysto sida qowsaarnimada xoolaha iyaga oo ka shaqeeya dowladaha Khaliijka. Kuwa khasabka wax ku tahriibiya waxa ay caruurta u qaadaan Sacuudi Carabiya iyaga oo ku khasba in ay ka tuugsadaan dariiqyada. Hayado shaqo bixineed oo shaki ku jiro ayaa fududeeya tahriibinta dadka iyaga oo xulanaya dadka xiiseeynaya in ay u haajiraan wadamada khaliijka ama Yurub si ay uga shaqeeystaan. Saraakiil ka tirsan dowlad federaalka ayaa lagu edeeyay in ay ka iibiiyaan dulaaliinta safarka iyo kuwa khasabka wax tahriibiya dukumeenyida lagu safro oo been abuur ah. NGOyda iyo ururo caalami ah ayaa soo sheega in

Soomaalidu ay si sii kordheeysa u raadiyaan in ay u guuraan meelo kale oo Afrika ah, oo ay ku jiraan Kenya iyo Koofurta Afrika. Masuuliyiinta Somaliland ayaa soo wariyay kororka safrinta ama afduubka caruurta iyo kuwa ka soo qalinjabiyay jaamacadaha ee shaqo la'aanta ah, kuwaas oo dabadeed sii mara Itoobiya iyo Suudaan ayaa waxaa mararka qaar u heysta afduub shabakado ka jira Liibiya marka ay u sii jeedaan Yurub iyo Bariga Dhexe. Xubno ka tirsan qurbo joogta Soomaalida ayaa isticmaal balanqaadyo guur oo been ah si ay ugu soo jiitaan dhibanayaasha aan tuhunsaneeynayn, iyada oo qaar badan oo ka mid ah ay yihiin qaraabo, si ay u tagaan Yurub iyo Mareeykan, halkaas oo lagu khasbo dhileeysi ama in ay madiidin ka noqdaan guryaha ah. Kuwa khasabka wax ku tahriibiya ayaa la sheegay in ay marsiiyaan shaqooyin khasab ah iyo ka faa'iideysi galmo caruurta Soomaalida ah ee ka soo cararaya Al-shabaab kana raadsanaya qaxootinimo gudaha Keenya. Baabuurta xamuulka ee badeecadaha u kala gudbiya Kenya ilaa Soomaaliya ayaa mararka qaar ku soo laabta Keenya iyaga oo wada gabdho iyo haween; kuwa khasabka wax ku tahriibiya ayaa la wareega gabdhahaas yar yar iyo haweenkaas waxa ayna u soo keexeytaan guryaha dhilooyinka ee ku yaala Mombaasa iyo Naryoobi si ay uga faa'iideystaan ama waxa ay u diraan meelo ka baxsan Kenya. Dadka Itoobiyaanka ah ee aan waraaqha wadan ee ku sugan waqooyiga Soomaaliya ayaa ah kuwo u nugul kuwa khasabka wax ku tahriibiya marka ay shaqooyin ka raadsadaan Puntland iyo Somaliland si ay u maalgaliyaan safoorkooda xiga ee Bariga Dhexe. Caruurta Itoobiyaanka ah ayaa u safra Somaliland iyaga oo raadsanaya shaqooyinka, laakiin waxaa halkeedii lagu khasbaa in ay tuugsadaan wadooyinka. Qaar ka mid ah kuwa khasabka wax ku tahriibiya ayaa la soo sheegay in ay odayaasha bulshada ku khasbaan, gaar ahaan gobolada xeebta, in ay xubnaha bulshada ku qanciyaan in ay ugu safraan Yurub fursado shaqo darteed; Shaqsiyaadka qaar ayaa la kulma in khasab loogu shaqeeysto gudaha Yurub.